Qoraalo Soomaali ah oo loogu talogalay

waaliddiinta iyo daryeelayaasha

Maxay yihiin Workabooks?
Workabooks waxaa ku yaala wax kasta oo ilmahaagu uga baahan yahay shaqada waxbarasho ee guriga ee dugsiga hoose, hal maado sannad dugsiyeedkii.

Shaqada waxbarasho ee guriga ee Workabook waa shaqadii waxbarasho ee fasalka oo la sii waasiciyey, wuxuuna ku salaysan yahay Manhajka Qaranka. Shaqada waxbarasho ee guriga ee Workabook wuxuu ku salaysan yahay saddex nooc oo hawlo shaqo waxbarasho guri ah: barasho, samayn, fekerid.

Layliyada barashada
Kuwaasi waxay ku lug leeyihiin waxyaalah ay tahay in ilmahaagu barto sannadkan. Qaar, sida shaxda iskudhufashada iyo taxa erayada, waxaa loo baahan yahay in la xafiddo. Bogaggaas waxaa dacaladooda laga dhigay buluug (xisaabta) ama oranj/liimi (Ingiriisi).

Layliyada barashada, ku celcelintu waa lama huraan waxaana laga yaabaa inaad jeclaysato inaad tijaabiso xaqiiqooyinka sida shaxda iskudhufashada marka aad iskuulka ku sii socotid iyo marka aad ka soo socotid.

Layliyada samaynta
Layliyada la samaynayo waxaa loo qaabeeyey in la xoojiyo barashada. Ka hel bogagga dacaladooda laga dhigay oranj/liimi (xisaabta) ama basali (Ingiriisi). Waxaa loo qoray saddex heer oo kala duwan:

- Heerka A: in lagu guulaysto kartida aasaasiga ah;
- Heerka B: in la gaadho oo lagu sugnaado heerarka la filayo ee qaranka;
- Heerka C: in la soo bandhigo caqabaddo.

Kala doordoorashadaan waxay dhamaan caruurta awood u siisaa inay guulaystaan oo horumar sameeyaan. Macalinka ayaa caadiyan dooran doona heerka, laakiin haddii sidoo kale ilmahaagu doonayo inuu isku dayo heerka ka sareeya, ku dhiirigeli inay isku dayaan!

Hawlaha fekerka
Hawlaha Fekerka (iyo Qoraalku) waxay muujiyaan sida xisaabta iyo Ingiriisada loogu adeegsan karo oo loogu dabikhi karo nolol maalmeedka. Kuwaas waxaa dacaladooda laga dhigay cagaar (xisaabta) ama casaan (Ingiriisi). Waxaa loo isticmaalaa xirfadaha laga bartay layliyada barashada iyo samaynta.

Workabooks waxaa sidoo kale ku jira waxyaalaha soo socda:

- ***qaamuus yare*** ka kooban erayo muhiim ah oo sannadka loogu talogalay. Caruurtu waxay kan u isticmaali karaan inay dhisaan qeexitaanadooda inta sannadka lagu guda jiro;
- ***bogagga gareeyga ah*** oo loogu talogalay faygarka iyo hawlaha kale ee gaarka ah;
- ***ku guulaysi*** bog caruurta ku dhiirigelinaya inay buuxiyaan Workabook-gooda;
- Ingiriisida, ***qoraal xafidan oo akhris*** bog kobciya xiisayn akhris;
- xisaabta, ***tixraac*** wuxuu leeyahay warbixinno dheeraad ah iyo dukumeentiyo caawin leh.

Bilaabidda
Shaqada waxbarasho ee guri waxaa caadiyan la samayn doonaa isbuuc walba. Fasalka gudahiisa, ilmahaagu wuxuu Workabook-giisa ku qoran doonaa hawlaha laga rabo inay soo dhamaystiraan. Marka uu ilmahaagu bilaabo shaqadiisa waxbarasho ee guri, hubi inay garanayaan waxa ay samaynayaan. Waa inay isku dayaan inay shaqada waxbarasho ee guri sameeyaan adigoo aan caawin, laakiin waad siin kartaa caawimo iyo gacan siin marka ay u baahan yihiin.

Hubi inay haystaan waxay ku tiirsadaan iyo inay ku shaqeeyaan qalinqori – si ay u sahlanaato in khaladdaadka la saxo!

Inta badan layliyada waxaa lagu samayn karaa hal xiisad, in kasta oo qaar ka mid ah Hawlaha Fekerka laga yaabo inay ku lug leeyihiin in wax la sameeyo dhawr maalmood, sida samaynta qoraal xafidan oo ah inta ay qaadato in iskuulka la gaadho.

In la siiyo qaabka ku haboon oo ilmahaagu ku sameeyo shaqada waxbarasho ee guri waa qayb muhiim ah oo ka mid ah caawinta ilmahaaga. Tan waxaa ka mid ah:

Joogteyn
Joogteyntu waa muhiim marka isku day inaad hesho wakhti joogto ah oo aan ilmahaagu aad u daalanayn, tusaale ahaan subaxnimada maalmaha isbuuca dhamaadkiisa. Waa inay noqotaa xilli aad joogto oo aad awoodo inaad caawiso haddii loo baahdo.

Arbushaad
Isku day inaad hesho meel ilaa intii macquul ah shanqadh la'aan ah oo ilmahaagu ku sameeyo shaqada waxbarasho ee guri. Waa inay ahaataa meel iftiin fiican leh oo aan alaabooyin ku daadsanayn. Ku dhiirigeli dadka kale ee guriga jooga in anaay arbushin ilmahaaga marka uu samaynayo shaqada waxbarasho ee guri!

© PSHB Co Ltd 2005, 2014

Baahiyaha aasaasiga ah
Hubi in aan ilmahaagu daalanayn, gaajoonayn, haraadanayn, dhaxamoonayn ama cadhaysnayn marka ay u fadhiistaan inay sameeyaan shaqadooda waxbarasho ee guri. Kuwaas oo dhami waxay xanibaad ku noqdaan si taxader leh u fekeridda iyo barashada.

Marka ilmahaagu dhameeyo, waa inaad saxeexdaa shaqada waxbarasho ee guri si aad u muujiso in la sameeyey. Saxeex sanduuqa odhaahaha waalidka/daryeelaha, markaa sax mid ka mid ah sanduuqyada:

- ***Gacan siin*** haddii ilmahaagu caawimo u baahnaa;
- ***Keligood*** haddii ilmahaagu keligii shaqada qabtay;
- ***Kalsooni*** haddii ilmahaagu keligii shaqada qabtay oo u qabtay si kalsooni leh.

Waxaa sidoo kale jirta meel banaan oo aad odhaah ku socota macalina ku qori karto – si aad ula wadaagto dhibaato ama ku guulaysi gaar ah, tusaale ahaan. Ugu dambayntii, hubi in buugani iskuulka lagu celiyo maalinta saxda ah.

Sida aad u caawin karto – ammaan oo dhiirigeli
Waalin ahaan/daryeele ahaan, waxaad awood aad u weyn ku leedahay xoojinta kalsoonida ilmahaaga – kalsooniduna lama huraan ayay u tahay waxbarashada.

Waxaad samayn kartaa farqi adigoo ilmahaaga ku dhiirigelinaya inay sameeyaan shaqada waxbarasho guri ee loo diyaariyey, iyo adigoo ka caawiya marka ay samaynayaan. Uma baahnid inaad taqaano dhammaan jawaabaha – keliya inaad u muujiso inaad danaynayso shaqadooda ayaa aad uga muhiimsan!

Haddii aan ilmahaagu hubin sidii uu u samayn lahaa shaqada waxbarasho ee guri, u akhri hawlaha oo weydii su'aalo 'degdeg' ah, sida:

- ***Ma ii sharixi kartaa waxa aad samaynayso?***
- ***Sidee ayaad tan u samaynaysaa?***
- ***Sidee ku ogaatey waxa la samaynayo?***
- ***Maxaad u baahan tahay inaad ogaato?***

Marka aad qaabkaan oo kale ilmahaaga ugala hadasho shaqada waxbarasho ee guri, waxay qaataan doorkii 'macalinka' waxayna kuu sharaxayaan waxa laga filayo. Tani laf ahaanteeda ayay muhiim u noqon kartaa.

Had iyo goor taageero haqab la'aan ah bixi, ammaan oo dhiirigeli! Isku day inaad siiso ammaan gaar ah oo ku wajahan qayb gaar ah oo ka mid ah shaqadooda, adigoo odhanaya sida: 'Waxaan ka helay sida aad…'; oo had iyo goor ilmahaaga ku dhiirigeli inay isu hanweynaan dhab a ka qaataan shaqadooda.

Haddii wakhtigu kugu yar yahay, caawimo iyo gargaar shaqo waxbarasho oo guri waxaa bixin kara qof kasta oo la aaminsan yahay – wuxuu noqon karaa walaal wiil ama gabadh ah, ayeeyo/awoowe ama deris; khasabna maaha inuu mar walba noqdo qof isku mid ah.

Waxbarashadu waa inay ahaataa masuuliyad ay wadaagaan guriga iyo iskuulku, shaqada waxbarasho ee guriguna waxay noqon karaa buundada isku xidha labadaa goobood ee nolosha ilmahaaga. Haddii aad si iskaashi ah aad iskuulka ula shaqayso, waxaad farqi dhab ah ku samaynaysaa barashada ilmahaaga!

Wixii warbixino dheeraad ah, booqo boggayaga internet-ka: www.workabook.co.uk

Turjumaad iyo isku habayn: worldaccent.com

© PSHB Co Ltd 2005, 2014